Fachhochschule Nordwestschweiz
Pädagogische Hochschule

ESKE

Ermittlung **s**chulsprachlicher **K**ompetenzen in der **E**rstsprache

SOMALI

Aufgabenset 5 bis 6 Jahre Schulerfahrung

© Pädagogische Hochschule FHNW 2018

Professur Deutschdidaktik und Mehrsprachigkeit im Kindesalter

Mathilde Gyger & Ursula Ritzau

Layli

1. Fadlan qoraalka kor u aqri.



Hangarale/Dibqalooc – waxay isku qoys/qabiil yihiin caarada
Fikrad fiican ma aha, hadii aad ku nooshahay wadamada kulul in aad fartaada geliso dalool darbi ku yaalo ama labo dhagax dhaxdooda. Ruuxa waa in uu kabihiisa ruxaa, lacala hadii aan waqti badan la gashanin. Waxaa lagayaabaa in lagu jiro. Hangaralaha/dibqalooca waxay jecelyihiiy mugdiga; waxay jecelyihiin maalintii in ay isku qariyaan gododka ama meelaha mugdiga ah. Hangaralaha/dibqalooca waxay ku noolyihiin wadamada kuleelaha oo dhan, laakiin badanaa lama arko.

Micida buu ku duraa si uu ogu dilo.
Hangaralaha/dibqalooca wuxuu noqonkaraa mid aad sun u ah, in kastoo badanaa uusan bini`aadinka dila karin. Sida ay u kala duwanyihiin dherarkooda wuxuu noqon karaa hal sitiimitir ilaa koow iyo labaadan sitiimitir . Kuligood seenta waxay ku leeyihhin mici sun ah. Marka hangaralaha/dibqalooca wax dilaayo, wuxuu wax ku qabtaa faraha hore, seenta buu u soo qaloociyaa dhanka dhabarka markaas buu ku duraa micida. Marka hangaralaha/dibqalooca cabsado durba wuu is wareejiyaa, seentana u soo wareejiyaa dhanka cadowga

Hangaralaha/Dibqalooca waxay habeenkii dabtaan caarada-weyn iyo cayayaanka Wuxuu ku taabtaa farahiisa, xoogna wuu u qabtaa wuxuu ku dilaa micida seenta ku taasho ee sunta leh. .

© 2018 Pädagogische Hochschule Fachhochschule Nordwestschweiz
IKU Prof. Deutschdidaktik und Mehrsprachigkeit im Kindesalter

2. Aqri layliga 1 iyo qeexida hoos ko qoran. Koobaabina mida saxda ama qaladka ah.

1. Hangaralaha/dabaqalooca waxay jecelyihiin mugdiga.	Sax☐ Qalad ☐
2. Hangaralaha/dabaqalooca kuli bini`aadan weey dili karaan.	Sax☐ Qalad ☐
3. A Hangaralaha/dabaqalooca oo dhan waa isku dherer.	Sax☐ Qalad ☐
4. Hangaralaha/dibqalooca waxay wax ku qabtaan farahooda.	Sax☐ Qalad ☐

© 2018 Pädagogische Hochschule Fachhochschule Nordwestschweiz
IKU Prof. Deutschdidaktik und Mehrsprachigkeit im Kindesalter

3. Qeex waxa uu ka hadlayo qoraalka layliga 1 .

© 2018 Pädagogische Hochschule Fachhochschule Nordwestschweiz
IKU Prof. Deutschdidaktik und Mehrsprachigkeit im Kindesalter

4. Qoraalka layliga 1 waxaa ku qoran, in kabaha la ruxo/ la jiljilo. Sabab maxaa taaloo samaynaayaa? Qeex sababta aad xaaladaa u tahay.

© 2018 Pädagogische Hochschule Fachhochschule Nordwestschweiz
IKU Prof. Deutschdidaktik und Mehrsprachigkeit im Kindesalter

5. Awoowe wuxuu xiiseeyaa balanbaalis maalin walba wuxuu adaa beerta, si uu ufiiriyo uuna shabaq ogu qabto balanbaalis. Wuxuu xirtaa koofi, si uu qoraxda/cadceeda iskaga difaaco. Maanta wuxuu arkay balanbaalis guduudan/casaan oo quruxsan, laakiin ma uusan qabanin. Xariijin mari inta u dhaxaysa awoowga iyo balanbaalista.

© 2018 Pädagogische Hochschule Fachhochschule Nordwestschweiz
IKU Prof. Deutschdidaktik und Mehrsprachigkeit im Kindesalter

6. Tartankee loo qaban wayay qoyaanka dartiis? Koobaabi mida saxda ah.

a) Tartanka kartoonka caanaha waa in uu ahaadaa mid xoojinaayo qaabnololeed caafimaad qaba. Tan keli`ah ee ka qaybqaadayaasha laga robo waa. Gaariga in laga sameeyo kartoonka caanaha maran, waa in uu ahaadaa mid gacanta laga wado, noqdana mid biyaha la dulmariyo si hadafka loo gaaro.

b) Xaflada tartanka waastada waxaa laqabanayaa modo 50 sano ah. Dhererka la ordaayo waa 58 Km waxaa jira xeer amaaneed. Gawaarida kuli waa in ay Qaab iyo weynaan u shabahaan waastoyinkii hore. Matoorka waa in uu aad u xoogbadnayn.

c) Tartanka wabi qalalan waxaa lagu qabanaayaa wabi qalalan. Marbaa la joojiyay, maadaama uu wabiga biyo keenay . „doonta“ waa in ay qaadan ka qayb galayaasha tartanka.

d) Koombada/daasada cabitaanka-Regatta sanad walba xaflad baa lagu abaabulaa. Gawaarida waxaa laga sameeyaa koombo/daasad maran matoorna waa lagu kiciyaa. Kuwo badan kicista bay ku halaawaan/qaribmaan, kaas oo ku kordhiya madadaalo guud.

© 2018 Pädagogische Hochschule Fachhochschule Nordwestschweiz
IKU Prof. Deutschdidaktik und Mehrsprachigkeit im Kindesalter

7. Schau dir die Landkarte an und beantworte die Fragen dazu.



a) Halkee u dhow dekeda?
☐ Magaalada.
☐ Harada/waadi.
☐ Beeraleeyda.

b) Meeshee xigta dhanka waqooyi?
☐ Garoonka diyaaradaha.
☐ Duur/howd.
☐ Beeraleeyda.

c) Marka aad magaalada ka timaado oo aad u socotid dhanka harada, jahadee qadanaysaa.
☐ Waqooyi.
☐ Galbeed.
☐ Bari.

d) Ka soo qaad, waxaad aadaysaa jasiirada duur. Qaaciidadan raac
- Ka bilaaw tuulada .
- Dhanka dekeda wadada u raac.
- Wareega labaad dhanka bidix u raac.
- Soco ilaa wadada dhamaato.
- Halkee joogtaa?

☐ Beeraleeyda.
☐ Magaalada.
☐ Dekatada.

© 2018 Pädagogische Hochschule Fachhochschule Nordwestschweiz
IKU Prof. Deutschdidaktik und Mehrsprachigkeit im Kindesalter

8. Qoraalka kor u aqri.

Buschball

Waligaa Buschball ma maqashay? Caadiyan waa isku dhaf ah kubada cagta iyo Golf.
Hadafka ciyaartu waa, in aad calanka surtid beel banaan oo dabiici ayna adagtahay in lala haleelo kubada marka lagu laado. Ogu yaraan waxaa lagu ciyaari karaa labo qof, mid in uu calanka suro kankalana in uu kubada laado si uu calanka ula helo.
Waxaa la xisaabaayaa intii darbo/laad, lala helay calanka. Sagaalna yay ka badanin.
Wareega koowadna halkaa buu ku dhamaaday Marka uu ciyaaryahan walba uu halmar calanka suro. Inta mar ee la ciyaaraayo waxaa go`aan ka gaaraayo dadka ciyaaraayo.

© 2018 Pädagogische Hochschule Fachhochschule Nordwestschweiz
IKU Prof. Deutschdidaktik und Mehrsprachigkeit im Kindesalter

9. Aqri qoraalka layliga 8 koobaabi mida saxda ah .

a) Muxuu ka hadlaayaa qoraalka?
☐ Qoraalka wuxuu qeexaayaa faraqa u dhaxeeya kubada cagta iyo Golf.
☐ Qoraalka wuxuu qeexaayaa xeerka ciyaarta Buschball.
☐ Qoraalka wuxuu qoraayaa calan qaas ah.
☐ Qoraalka wuxuu qeexaayaa, halka calanka looga baahnaan karo.

b) Was muss man beim Buschball treffen?
☐ Ciyaaryahan calanka haayo.
☐ Calan ciyaaryahan gacanta ku haayo.
☐ Calan dhulka ku mudan.
☐ Labo calan dhulka ku mudan.

c) Maxaa la xisaabinaa?
☐ Inta mar ee hadafka lala haleelay.
☐ Inta mar ee lala waayay.
☐ Kuwa ciyaaraayo baa go`aanka gaareeyso.
☐ Inta laad/darbo lala helay.

d) Labadee ciyaar bay qusaysaa Buschball?
☐ Golf iyo Teenis.
☐ Kubadacagta iyo Golf.
☐ Kubadagacanta iyo kubada cagta.
☐ Golf iyo kubadagacanta.

e) Goormeey ciyaarta dhamaanaysaa? Marka ciyaar- yahaniinta halmar…
☐ Calanka dhulka ku mudaan.
☐ Marka labo mar la haleelaan.
☐ Marka ay kubada/banooniga tuuraan.
☐ Marka ay cayaar yahanka kale ku dhuftaan.

f) Waa maxay isku dhafka „kubada cagta iyo Golf“?
☐ Ciyaarta waxaa lagu ciyaaraayaa labo wado isgoynayso.
☐ Waa ciyaar isku waqti la ciyaaraayo kubada cagta und Golf.
☐ Ciyaartu waa in yar sida kubada cagta iyo in yar sida Golf.
☐ Koox waxay dheelaysaa kubada cagta kuwa kala isku waqti Golf.

© 2018 Pädagogische Hochschule Fachhochschule Nordwestschweiz
IKU Prof. Deutschdidaktik und Mehrsprachigkeit im Kindesalter

10. Ka fikir saaxiibkaa ama saaxiibadaa fiican. Qor sida aad u saaxiibteen, sababta saaxiibkaa ama saaxiibadaa aad oga heshid iyo waxa aad ka aaminsantahay saaxiibtinimada.

© 2018 Pädagogische Hochschule Fachhochschule Nordwestschweiz
IKU Prof. Deutschdidaktik und Mehrsprachigkeit im Kindesalter